





Pre-K

HAGAHA HEERARKA QOYSKA EE MINNESOTA

Caawinta waxbarashada ardayda
dhigata Fasalada Pre-K




great
MN
SCHOOLS

Waxyaabaha ku saabsan hagahaan

Qoysasku waxay doonayaan in ay ogaadaan waxa loo baahan yahay in canuggoodu ogaado si uu ugu diyaar garoobo dugsiga barbaarinta ubadka. Waa macalinka koowaad-ee canuggooda-waana kan ugu muhiimsan.

Waaxda Waxbarashada ee Minnesota waxay samaysay liisaska hadafyo ku saabsan waxa la doonayo in dhammaan carruurta bartaan kahor inta aysan bilaabin dugsiga barbaarinta ubadka. Haddii canuggaagu dhigto dugsiga barbaarinta kahore iyo haddii kaleba, hagahaanu wuxuu kaa caawinayaa in aad fahamto waxa la doonayo in canuggaagu ka ogaado Luuqadda, Akhris-Qoraalka, Wadaxariirka, & Xisaabta si u noqdo mid diyaar u ah dugsiga barbaarinta ubadka.

Dhammaan carruurta waa in ay maraan baaritaanka hubinta ah ee ka horreeya dugsiga barbaarinta ubadka kaasoo uu marinayo dugsiga degmadu. Waxaa wanaagsan in canuggaagu baaritaankaan uu maro marka uu 3 sanno jirka yahay. Waa mid bilaash ah diyaarna u ah dhammaan carruurta ayada oo aan loo eegayn marxaladda soogalootinimada ee ay kujiraan. Si aad u hesho xarunta baaritaanka ee kuugu dhow, wac 651-582-8412. Baaritaanku wuxuu canugga ka caawinayaa in uu dareemo in uu u diyaarsan yahay dugsiga barbaarinta ubadka. Wuxuu ka caawin karaa in qoysasku helaan qaabab cusub oo canuggoodu wax ku baran karo kuna kori karo.





Hagahaan waxaa kamid ahs



Waxa loo baahan yahay in canuggaagu ogaado awoodna u yeesho in uu sameeyo–

BOGGA 4 EE ELA & **BOGGA 10** EE MATH

Qaybta ugu muhiimsan (cilmiga iyo xirfadaha) ee loogu talagalay inay ardaydu ku bartaan Pre-K



Howlaha maalinlaha ah oo lagu taageerayo waxbarashada–

BOGGA 7 EE ELA & **BOGGA 12** EE MATH

Qaababka aad ku taageeri karto canuggaaga si uu u barto casharka muhiimka ah iyo xirfadaha ee kujira Luuqadda, Akhriska-Qoraalka, Wadaxariirka, iyo Xisaabtah



Eeyada waxbarashada–

BOGGA 13

Qeexitaanada ereyada inta badan waxbarashada loo adeegsado ee khuseeya dugsiga ka horreeya dugsiga barbaarinta ubadka



Faniga Luuqadda Ingiriisiga

**WAXA LOO BAAHANN YAHAY IN CANUGGAAGU
OGAADO AWOODNA U YEE SHO IN UU SAMEEYO**

Maskaxda carruurta waxay aad u kortaa marka ay yar yihiin. Marka ay da'daan jiraan, carruurta waxay bartaan luuqadaha ayaga oo cayaaraya waxna sahminaya. Marka ay helaan wax ayaga ku cusub, waxay rabaan in ay wax kasi ogaadaan. Inta aad ka caawinayso canuggaaga barashada wax akhriska, waa in aad ogaataa in carruurta aysan ku wanaagsanaan karin wax akhriska ayaga oo xifdinaya qaababka ereyada ama ayaga oo fiirinaya sawiraanta si ay u qiyaasaan ereyada. Carruurta waa in ay bartaan in alifbeetadu ay tahay koodh, iyo in xarfuhu u taagan yihiin dhawaaqyo (loo yaqaano dhawaaq ereyeed). Waxay u baahan yihiin in ay si talaabo-talaabo ah ugu bartaan dhawaaq kasta iyo xarfaha uu u taagan yahay dhawaaqasi.



Tsi ay ugu diyaar garoobaan Dugsiga Barbaarinta Ubadka, ardayda dhigata dugsiga kahorreeya Dugsiga Barbaarinta Ubadka waa in ay si wanaagsan u yaqaanaan qaabka waxyaabaha soo socda loo sameeyo:

- ☑ Waa in ay ku dhawaaqaan magacooda koowaad iyo kan awoowgood ayna qoraan magacooda koowaad
- ☑ Waa in ay yaqaanaan farqiga u dhexeeya xarfaha alifbeetada iyo calaamadaha kale

d P f h R w x

@ \$ ^ # %

- ☑ Waa in ay yaqaanaan in ereyada Ingiriisiga qoritaanka laga soo bilaabo bidixda loona wado midigta iyo sidoo kale in laga soo bilaabo kor loona wado qaybta hoose ee bogga waraaqda
- ☑ Waa in ay gartaan dhawaqyada erey kujira siina wadaan habdhaca dhawaaqa

Waa in ay dhageystaan ereyga

mat

hot

chat

Waa in ay gartaan dhawaqyada

/m/→/a/→/t/

/h/→/o/→/t/

/ch/→/a/→/t/

Waa in ay dhageystaan habdhaca dhawaaqa

I see a bee asleep on a tr__

Run for fun under the s__

The ball will fall off the w__

Waa in ay sii wadaan habdhaca dhawaaqa

/ee/

/un/

/all/

I see a bee asleep on a **tree**

Run for fun under the **sun**

The ball will fall off the **wall**

- ☑ Waa in ay raacaan tilmaamaha leh 2 talaabo ama ka badan marka lala hadlo

“Kor ubood adoo lugaha iyo gacmaga kala bixinayo kaddibna sagxadda fariiso”



- ☑ Waa in ay si cod dheer ah ugu hadlaan jumlad dhammaystiran (5+ ereyo ah) si cadna loo fahmi karo
- ☑ Waa in ay sii wadaan wadasheekaysiga la isdhaafsano
- ☑ Waa in ay su'aalo dadka weydiiyaan kana jawaabaan si ay u helaan kaalmada ay u baahan yihiin ama macluumaad dheeraad ah
- ☑ Waa in ay sheekada kusoo celin karaan
- ☑ Waa in ay isticmaalaan ereyo, sawiraan, xarfo, ama calaamado si ay u muujiyaan aragtidooda dadkana ula wadaagaan waxyaabaha ay barten ama ay ayagu abuureen¹



[Transcript: Mom, I love you.]

¹Tusaaleyaasha muunadaha qoraalka ah ee dugsiga kahorreeya dugsiga barbaarinta ubadka kuwaasoo ka socda Reading Rockets <https://www.readingrockets.org/looking-at-writing/pre-k>



HOWLAHA MAALINLAHA AH EE LAGU TAAGEERAYO WAXBARASHADA

★ *In aad canugaaga kula sheekaysato luuqaddiina hooyo ayaa ah mid kamid ah qaababka ugu wanaagsan oo lagu hormarin karo xirfadaha akhris-qoraalka. Iska ilaali isticmaalka kaliya ereyada fudud marka aad carruurta yaryar la hadlayso*

- Si cod dheer wax ugu akhri canuggaaga ugu yaraan 20 daqiiqo malain kasta. Intaa kaddib, kala hadal wixii aad u akhriday waxaadna canuggaaga u sheegtaa in uu kusoo celiyo qaybo kamid ah sheekada
- U ogolow in canuggaagu soo qabsado wax xiiso leh oo uu wax badan ka barto. Akhriya buugaag, eega waxyaabaha intarneetka kujira, si wadajir ahna wax isula sameeya si aad wax badan uga ogaataan mowduuca uu doortay
- Sii canuggaaga wakhti fara badan oo uu cayaarta kaga maqnaado daawashada dhalada. Arrintaan shaqo kuma lahan boombaleyaasha aad usoo iibiso. Carruurta waxay wax ka baran karaan cayaaraha ay ayagu la yimaadaan ee ay ka samaystaan ashyaada caadiga ah ee guriga iyo bannaankiisa yaala (bokisyada maran, dhalooyinka, garaafeyaasha, dhagxaanta, iyo ulaha)
- La cayaar cayaaraha codka leh canuggaaga. Dooro codka aad ka bilaabaysaan in uu noqdo mid leh ereyada ugu badan ee aad awooddaan ee jumlad kujira

**Leo Lion laughs loudly
Tina took Tevin's toys
A tiger teased a turtle by telling tall tales**

- Ku wada heesa heesaha carruurta waxaadna isla akhrisaan gabayada. Sameeya dhaqdhaqaaq adinka oo farta ku fiiqaya codadka iyo heesaha inta aad heesaysaan waxna akhrinaysaan

Little Miss Muffet

1. Little Miss Muffett
2. Sat on a tuffet
3. Eating of curds and whey;
4. There came a big spider
5. who sat down beside her,
6. And frightened Miss Muffett away.

- Weydii canuggaaga in uu helo codadka kujira bilowga, dhexda, iyo dhammaadka ereyada aad ku hadasheen. Ku kala sooc ereyada dhawaqyadooda (/b/ /a/ /t/). Kaddibna dib isugu keen (“b→a→t, bat!”)
- La samee canuggaaga buugga “waan awoodaa” kaasoo ay ka buuxaan guulaha canuggaaga. Waxaad isku dhajisaan waraaqo badan oo wax ku qorneyn si aad buug uga samaysaan. Marka canuggagu guul cusub gaaro, sida marka uu barto sida magaciisa loo qoro, wuxuu galin karaa buugiisa “waan awoodaa.” Canuggaagu wuxuu sawirri karaa sawiraan ama wuxuu qori karaa ereyo si uu u muujiyo xirfadaha cusub ee uu bartay
- Sii canuggaaga tilmaamo maad leh, hal abuur leh, gaarna ah si uu u raaco dhaqdhaqaaq ku taxaluqa iyo goobaha xujada ah, sida dhinaca, hareeraha, iyo kuxiga. U ogolow in canuggaagu tilmaan kusiiyo sidoo kale sidoo kalena raac adiga oo mararka qaar si ulakac ah khaladaad u smaaynaya. Eeg in canuggaagu khaladkaa qaban karo iyo in kale!

Soo qaad shanlada timaha waxaadna dhigtaa koomadiinka gadaashiisa

U warwareeg qaab goobo ahaan ah adiga oo si degen magacaaga u sheegaya

Gacanta midig kusoo qaad hal sigisaan oo cad waxaadna galisaa qaybta danbe ee kabta

Dooro laba kamid ah xayawaanada boombalada ah waxaadna u dhigtaa afganbi sariirtaada hoosteeda

- Ku celceli adiga oo sheegaya alifbeetada oona magacaabaya mid kasta oo kamid ah xarfaha farta waaweyn iyo kuwa farta yaryar ah. Ku cayaar cayaaraha xasuusta iyo isku aadinta xarfaha. Hel calaamadaha xarfaha, kujira bakhaarada, iyo ayaga oo qayb ka ah howl kasta
- Weydii canuggaaga in uu kaa caawiyo xallinta dhibaato fudud oo guriga dhexdiisa ah. U daa canuggaaga in uu dhibaataada xaliyo una sharraxo qaabka uu u xalliyay


“Waxaanu shaatigeena aan jecelnahay xiran karnaa oo kaliya marka uu nadiifka yahay, maxaan samayn karnaa kaddib marka aan xirano shaatigeena si aan u xaqiijino in la nadiifiyo?”

“Haddii aan rabno in aan wasakh badan nadiifno kaddib qadada, wakhti ku filan uma heli doono sheekadeena. Maxaan samayn karnaa si aan iskaga ilaalino in aan wasakh badan keeno qadada kaddib?”

- Samee xaraf todobaadka ah todobaad kasta. Sharrax sawirka xarfka, kasoo dhexsaar xarfka waxyaabo kala duwan (riinji, carro, jeesto) waxaadna xarfka kasoo saartaa guriga ama si dhab ah



10s



5s



Xisaabta

**WAXA LOO BAAHAN YAHAY IN CANUGGAAGU
OGAADO AWOODNA U YEE SHO IN UU SAMEEYO**

Si ay ugu diyaar garoobaan Dugsiga Barbaarinta Ubadka, ardayda dhigata dugsiga kahorreeya Dugsiga Barbaarinta Ubadka waa in ay si wanaagsan u yaqaanaan qaabka waxyaabahaan loo sameeyo:


- ✔ Waa in ay ereyada tirooyinka si sax ah u sheeggaan ayaga oo ka bilaabay 0 gaynayana ilaa 29
- ✔ Waa in ay ereyada tirooyinka si sax ah u sheeggaan ayaga oo ka bilaabay 10 gadaalna usoo wadaya

“Toban → sagaal → sideed → todoba...”

- ✔ Waa in uu magacaabo lambarka ku xiga tirada ilaa laga gaarayo 9
- ✔ Waa in uu magacaabo lambarka ka horreeya ilaa laga gaarayo 5
- ✔ Waa in uu akhriyaa uuna qoraa tirooyinka laga bilaabo 0 ilaa 10, ayada oo loo ogolyahay in uu tirooyinka qaar gadaal u akhriyo




- ✔ Waa in uu tiriyaa walxaha uuna sheegaa tirada saxda ah ee ashyaada marka la weydiyo (tirooyinka gaaraya ilaa 10)
- ✔ Waa in uu ashyaada ku kala soocaa hal tayo ama ka badan (tusaale ahaan: midabka, qaabka, baaxadda)





HOWLAHA MAALINLAHA AH EE LAGU TAAGEERAYO WAXBARASHADA

- Ku celceliya tirinta horey iyo gadaal. Dajjiya hadaf iskuna daya inaad tiro tii hore ka badan tirisaan todobaad kasta
- Ku celceliya garashada iyo magacaabista tirooyinka. Ku cayaara cayaaraha xasuusta isku aadinta tirooyinka ee 1-9
- Iskula heesa heesaha tirada, adinka oo horey iyo gadaalba wax u tirinaya
- Weydii canuggaaga in uu isticmaalo ereyada qeexaya baaxadda. Canuggaagu hasoo helo mir weyn, mir kasii weyn, iyo mirta ugu weyn ee baaquliga kujirta. Waa maxay shayga ugu yar ee armaajada kujira? Boombaleyaashaan kee ayaa weyn?
- Soo aruuri ashyaay yaryar oo guriga hareerihisa yaala canuggaaguna ha tiriyo ashyaada si cod dheer ah (“Hal sabiib ah. Laba sabiib ah.”)
- Weydii canuggaaga su’aalaha ‘imisa’ (“Imisa sabiib ah ayaa xirmada kujira? Imisa ayaa xirmadaas kujira?”). Isticmaal caddad yar oo uu canuggaagu si sax ah u tirin karo
 1. U kala qaybi kooxaha laba qaybood si aad u weydiiso su’aalaha kan weyn/kan yar (“Yaa badan sabiibka kooxdaan iyo middaas?”)
 2. Weydii canuggaaga tirada sabiibka aan u baahanahay si qof kasta oo qoyska kamid ah uu u helo 1
- La cayaar cayaarta fudud ee turubka taasoo ku saabsan tirinta iyo isbarbardhigga tirooyinka (“Waxaan haystaa turub 5-le ah adiguna waxaad haysataa mid 7-le ah, yaa badan labadeena?”)
- Canuggaagu ha tiriyo saxamada, weelasha qalinka ah, koobabka, iyo istiraashada marka uu fadhiyo miiska cuntada
- Akhriya buugaagta sheekooyinka ee tirada ku saabsan
- Ku cayaara cayaarta “Waxaan hayo sheeg” ee naqshadaha leh. Isla raadiya naqshadaha dhabta ah ee dunida kajira. Soo hel naqshad, sida bokiska kabaha ee afargeeska ah, waxaad dhahdaa “Waxaan hayaa afargees”, canugaaguna ha sheego



Ereyada waxbarashada

Bareyaashu waxay adeegsadaan ereyo micno gaar ah leh marka ay dugsiyada joogaan. In aad ereyadaas fahamto waxay kaa caawinaysaa in aad macalinka la hadasho.

AKHRIN QORAAL



Ayada oo la adeegsanayo xiriirka ka dhexeeya xarafka iyo dhawaaqa in si sax ah loogu dhawaaqo looguna hadlo ereyada. Tusaale ahaan, carruurta baratay dhawaaqyada ereyada Ingiriisiga ah /a/, /c/, & /t/ waa ay akhryn karaan qoraalka “cat.”

DHAWAQ EREYEDKA



Ereyadu waxay ka samaysan yihiin dhawaaqyo gaar-gaar ah oo loo yaqano dhawaq ereyeed. Caruurta waa in ay ku tababartaan garashada, soo saarista, iyo isku aaddinta codadkaan gaarka ah.

BARAARUGGA DHAWAAQA EREYADA



Aqoonsashada dhawaaqyada luuqadda. Tusaale ahaan, jiiibta, ereyada, iyo dhawaaqyada ereyada kujira.

ILAHA


Muuqaal wata 44 dhawaq ee luuqadda Ingiriisiga:
<https://www.youtube.com/watch?v=wBuA589kfMg>.

REFERENCES

Minnesota Department of Education Early Childhood Indicators of Progress
<https://education.mn.gov/MDE/dse/early/highquale/ind/>

Help Me Grow Minnesota
<https://helpmegrowmn.org/HMG/HelpfulRes/index.html>

Seek Common Ground Family Guides
<https://seekcommonground.org/family-guides>



QORAALO

Handwriting practice lines consisting of solid top and bottom lines with a dashed middle line, repeated five times.



Waxaa kuu keenay ururka aan faa'iido doonka ahayn, Dugsiyada Great MN. Ogow waxbadan & oo ugu deeq greatmnschools.org.

Nala wadaag waxa aad ku samaysay gaadkan!

